

U-doodidu waxay la xidhiidhaa qeexida dhibaatooyinka iyo gorgortanka xalka.

Baro qawaaniinta ciyaarta – aqoontu waa awood:

- Baro xuquuqdaada iyo waajibaadkaaga iyo weliba qawaaniinta la xidhiidha.
- Baro siyaasadaha nidaamka iyo hababka dhammaan nidaamyada aad ku shaqaynayso.
- La xidhiidh urur ah u-doodid/naafo haddii aad qabto su'aalo ama dhibaato la xidhiidha ilmahaaga adeegiisa.
- Waxtar ayey noqon kartaa la hadalka ama ka barashada dadka kale ee soo arkay waayoaragnimo aad wadaagtaan. Waxa jira dhawr kooxood oo nidaam-hawleed iyo taageero Twin Cities gudaheeda.
- Focus on why you want what you want for your child.

Qorshee oo diyaari – dadka diyaarka ahi waxy gaadhaan go'aano fiican:

- Qeex baahida iyo itaalka ilmahaaga, iyo sida ugu wanaagsan ee ilmahaaga loo taager karo.
- Fadhiiso fadhiyada kahor oo qor himilooyinkaaga iyo fikrado cusub ama ra'yi aad hayso.
- Waxtar ayey noqon kartaa qof kuu soo raaca fadhiyada oo qoraalada kuu sameeya, ku toosiya iyo/ama ku siiya taageero.

Kaydi xogta macluumaadka oo qoraal ah:

- Kaydi fayl – ku dar xogta qiimaynta, caafimaadka, waxbarashada, adeegyada, dhaqaalaha, iyo xiriirada.
- Wax qoro fadhiyada dhexdooda iyo telefoonada iyo taariikhda, wakhtiga iyo magacyada oo dhan.
- Wax kasta qoraal ku dhig— abuur taxane qoraal..
- Ku firfircoonow u-doodidaada —hayso nuqulo dhokomentiyada aad hayso ee aad rabto in kuwa kale akhriyaan.

Su'aalo weydii, dhagayso jawaabaha:

- Qor jawaabaha aad u hesho su'aalahaaga iyo wixii ahmiyad ah.
- Warso sharaxaad haddii aad wax si buuxda u fahmi weydo.
- Xusuuso in si cad oo buuxda u hadasho—toosna u abaar waxaad u baahan tahay ee aad filanayso.
- U firso sidaad wax u odhanayso—adeegso erayga “Aniga” oo iska jir adeegsiga “laakiin” “marnaba” iyo “badiyaa”.
- Dhagayso jawaabaha—xusuuso helitaanka jawaab aanad rabin in aanay ahayn jawaab maad helin.

Qeex dhibaatooyinka oo soo-jeedi xallintooda:

- Culayska saar itaalka, ahmiyada iyo wixii mudnaan leh.
- Adeegyada waa in laga wada-hadlo oo laga heshiiyo.
- Waxa laga yaabaa in aanad gaadhin xal toos ah markaas ka sii fakir waxaad ogolaan karto.
- Xusuuso in dhammaan qorshayaashu ay ku salaysnaadaan baahida ilmahaaga.
- Haddii aad wax diido, si cad u sheeg sababta aad ku diiday oo fikirkaaga ka dhiibo sida loo beddli karo.
- Haddii lagu warsado inaad wax ku saxiixdo shirka, wakhti qaado iskaga akhrido oo hubiso inta aanad saxiixin.
- Xil kuma saarna aad shirka wax ku saxiixdo; waxaad u qaadan kartaa qorshayaasha guriga si aad dib ugu fiiriso.
- Ha saxiixin foom madhan ama badh madhan, ee hubi inaad fahamtay oo aad ogoshahay qorshaha idilkiis.
- Haddii qorshuhu aanu caddayn ama aanad ogolayn qayb ahaan, hubi inaad diido qorshaha qoraal ahaan si aan qorshaha loo fulin adiga oo aan ogolaan.
- Waxaad codsan kartaa fadhiyo dheeraad ah si loo xalliyo wixii dhibaatooyin ah.

Wixii macluumaad dheeraad ama adeegyo u-doodid ah, kala xiriir Arc Greater Twin Cities 952-920-0855 ama booqo www.arcgreatertwincities.org.